

Xeerka Bukaanka Ee Isbitaalada Dadweynaha



Waxaad xaq u leedahay inaad filato aadna ka hesho isbitaalka dadweynaha adeeg leh taya aad u sarraysa.

Xeerkaani wuxuu wacyigelinayaa ama kor u qaadayaa heerka wada shaqaynta ka dhexaysa adiga iyo shaqaalaha caafimaadka. Haddii aad qabto wax dhibaato ah aadna rabto inaad ka hadasho, isbitaalkaagu wuxuu yeellan doonaa Wakiilka Bukaanka kaas oo aad u sheegi karto waxaad qabto. Weydii shaqaalaha waaxda ama Miiska soo dhoweynta wixii intaas ka badan. Kuwaan soo socda ayaa ah xuquuqdaada iyo masuuliyadkaaga isbitaalada guud.

Xuquuqdaada

Waxaad xaq u leedahay:

Adeegyada isbitaalka dadweynaha oo aad u kala duwan

Meel kasta oo aad ka joogto gobolka, waxaad helli kartaa adeegyo bixiya taya sarre iyo daryeel ku haboon.

Daaweynta ku salaysan baahi daawo iyadoo aan ku xirnayn awoodaada bixinta ama xaalladaada caymiska caafimaadka.

Waxaad xaq u leedahay inaad hesho daaweyn, maadaama xaalladaada caafimaad u baahan tahay iyadoo aan ku xirnayn inaad tahay bukaan gaara ama mid guud.

Kala dooro haddii aad doonayso in lagu daaweeyo sidii bukaan gaara ama mid guud.

Waxaad awoodaa inaad go'aan ka gaarto in lagu jiiifiyo isbitaalka sidii bukaan gaara ama mid guud.

Ku daryeelida iyo ku daaweynta jawi amaana

Waxaad xaq u leedahay inaad dareento amaan, nadaafad, aadna qanacsan tahay inta aad isbitaalka jiipto.

Codso mutarjum la aqoonsan yahay, haddii aadan ku hadlin Ingiriiska

Waxaad xaq u leedahay inaad isticmaasho adeega tarjumaada wixii macluumaada ee muhiima sida jifiska, wada hadalka ku saabsan taariikhdaada caafimaad iyo daaweyntaada.

Adeegyada loo bixiyo si waafaqsan dhaqanka

Waxaad xaq u leedahay inaad si buuxda lug ugu yeellato go'aanada khuseeya daryeelkaaga laguna siiyo fursad aad ku weydiiso su'aallo wada hadalna kala yeellato daaweyntaada.

Waxaad kaloo magacaabi kartaa qof si uu kuugu sameeyo go'aano daaweyneed haddii aadan adigu awoodin inaad samayso go'aan mar uun.

Ka qaybgal go'aanada helna macluumaad ku saabsan markaad isbitaalka ka baxayso

Waxaad xaq u leedahay inaad ka qaybgasho go'aminta ku saabsan marka aad isbitaalka ka baxayso iyo hellitaanka macluumaadka ku saabsan adeegyada la helli karo. Waxaa laga yaabaa inaad isbitaalka ka baxdo taas oo ka soo horjeeda talada dhakhtarkaaga, si kasta ha ahaatee, waxaa laga yaabaa in lagu weydiisto inaad saxiixdo foom aad ku aqbalayso masuuliyada go'aankaaga.

Macluumaad ku saabsan isbitaalkee ku siin doona daryeel

Waxaad xaq u leedahay in lagu sheego cida masuulka ka noqonaysa daryeelkaaga iyo sida iyaga loola xiriiro.

Macluumaadka ku saabsan daryeelka caafimaadkaaga iyo, haddaad rabto, aragti daaweyneed oo kale

Waxaad xaq u leedahay in si buuxda laguugu sheego wixii ku saabsan daaweyntaada aadna hesho aragti kale, hadday lagama maarmaan tahay.

Hellitaanka diiwaanka caafimaadkaaga iyo sirta macluumaadkaaga shakhsiyeed

Waxaad xaq u leedahay inaad aragto diiwaanka caafimaadkaaga taasna waxaa lagu samayn karaa ado mara dhakhtarkaaga ama hay'ada Freedom of Information.

Qof kasta oo lug ku lahaa daaweyntaada iyo daryeelidaada waxaa saaran masuuliyad sharci iyo mid aqooneed inuu ilaaliyo macluumaadka ku saabsan sirtaada.

Daaweyn leh ixtiraam, sharaf iyo qadarinta arrimahaaga gaar ahaaneed

Iyadoo dadaal walba oo suurtagal ah la samaynayo, adeegyada caafimaadku waxay ku bixin doonaan daryeel iyo daaweyn meel ogolaanaysa ilaalinta arrimahaaga gaar ahaaneed. Waxaa lagaa filayaa inaad ula dhaqanto shaqaalaha isbitaalka si ixtiraam iyo qadarin mudan.

Macluumaadka talaabooyinka isbitaalku qaado si uu ku wanaajiyo tayada daryeelka

Isbitaalku waa inuu awoodaa inuu ku siiyo warbixinta sida ay ku hagaajinayaan tayadooda. Fadlan la socodsii shaqaalaha haddii adiga ama xubin ka mid ah qoysku arkaan dariiqooyin lagu wanaajin karo adeegyada.

Fursad aad kaga hadasho su'allo ama cabasho kasta oo laga yaabo inaad qabto taas oo khusaysa joogitaankaaga isbitaalka.

Haddii aad qabto su'allo ama cabasho la hadal kooxda daaweynta ama Wakiilka Bukaanka Isbitaalka.

Cabasho u gudbinta Ururka Cabashooyinka ee madaxabanaan

Waa inaad isku daydaa ugu horayn inaad la dhamayso cabashada shaqaalaha isbitaalka.

Haddii aadan weli ku qanacsanayn, waxaad u gudbin kartaa cabasho Xubinta-Guddiga Adeega Caafimaadka.

Masuuliyadahaaga

Waxaad leedahay masuuliyada inaad:

La shaqayso kooxdaada daaweynta adigoo bixinaya macluumaadka ku haboon ee ku saabsan caafimaadkaaga iyo duruufaha laga yaabo inay saamayn karaan daaweyntaada, soo ladnaanshahaaga ama joogidaada isbitaalka.

Wixii Macluumaada ee intaas ka badan

Macluumaadka ku saabsan xeerka Bukaanka Isbitaalka Dadweynaha waxaa laga helli karaa:

Patientcharter.health.vic.gov.au



Xubinta-Guddiga Adeegyada

30th floor, 570 Bourke Street, Melbourne 3000

Tel: 8601 5200

Lacag la'aan 1800 136 066

Fakis 8601 5219

Website-ka www.health.vic.gov.au/hsc